

## **Sadexda Su'aalood ee Hopkins Looga Codaynayo November 7**

Maalinka Talaadada ee November 7, Maamulka Waxbarashada Hopkins waxa uu qabanayaa doorasho codbixineed oo ka kooban sadex su'aalood oo kala ah — Dayn si hordhac ah loo sii qaadanayo si loo balaariyo goobaha waxbarashada, canshuur dheeri ah oo la bixinayo si qalabka waxbarashada iyo manhajka loo tayeeyo iyo canshuur kordhin lagu daboolayo kharashka guud ahaan lagu kobcinayo hawlaha waxbarashada.

### **Su'aasha 1: Sii Qaadashada Daynta Dhismaha mustaqalka**

Codbixiyayaasha waxaa la waydiinayaa in ay u codeeyaan \$30 million oo dayn hormaris ah si loo dayactiro loona horumariyo xarumaha waxbarashada. \$6.9 million waxaa loo isticmaalayaa maalgalinta canshuurta kirada oo wadata dulsaar aad u qiime hooseeya si loo tashiilo lacagta canshuur bixiyayaasha.

### **Su'aasha 2: Mashruuca Canshuur Kordhinta Dakhliga**

Codbixiyayaasha waxaa la waydiinayaa in ay u codeeyaan in la abadalo qaabkii hore canshuur kordhinta ee sanadihii 2010 iyo 2013 oo hada soo saara \$9.4 million sanadkiiba oo lagu bixiyo manhajka iyo qalabka waxbarashada, oo la doonayo in laisku daro oo ay noqdaan hal canshuur kordhin. Degmada Hopkins waxa ay codsanaysaa in la sameeyo canshuur kordhin aad u hoosaysa oo noqonaysa in ka yar 0.5% (.44%) oo soo kordhinaysa \$500,000 sanadkii.

**Su'aasha 3: Maalgalinta Howlaha Waxbarashada** Si loo sii wado shaqada ugu wanaagsan ee hada socota. Codbixiyayaasha waxaa la waydiinayaa in ay u codeeyaan in la badalo qaabka maalgelineed ee hada canshuurta loogu jaro hawlaha waxbarashada, laguna badalo qorshe 10 sano soconaya kaas oo kharashka ardaygiiba ka dhigaya isku mid. Maalgalintani waxa ay soo saaraysaa \$15 million sanadkiiba. Hadii la ansixiyo ma jiri doonto canshuur dheeri ah oo ay dadka guryaha leh bixinayaan.

### **Maxaa loo samaynayaa isbadalkan?**

**Doorasho:** Waa codbixin ama afti ay muwaadiniintu ku dooran karaan wixii ay doonaan

**Dayn:** Qaadashada daynta waxaa loo isticmaalayaa in lagu dayactiro ama lagu dhiso xarumo. Kharashka ka soo xarooda dayn qaadashada waxaa loo isticmaali karaa qaabka codbixinta loogu ansixiyay, loomana isticmaali karo hawlaha kale ee uu wado maamulka waxbarashadu.

**Kordhinta Dakhliga:** Maalgelintani waxa ay maamulka waxbarashada degmada siinaysaa awood ay ku balaariyaan waxyaalaha ay gadan karaan sida qalabka casriga ah ee ay ardaydu wax ku baranayaan iyo manhajka. Awoodaasi waxa ay jiridoontaa mudo cayiman.

**Maalgalinta Howlaha Waxbarashada:** Canshuur ay ansixiyeen ayna bixinayaan dadka degmadu si loogu taageero barnaamijyada ardayda, balaarinta fursadaha ardayda iyo hawlaha kale ee ay degmadu fulinayso. Kharashkan waxaa loo isticmaalayaa in lagu

hagaajiyo laguna horumariyo tayada waxbarashada hada jirta iyo qaabka baristaba.

**Waqtiga iyo goobta codbixinta waa ?**

Maalinka codbixintu waa November 7, 2017!

Waxaad gashaa websiteka Xoghayaha Gobolka si aad u ogaatid goobta aad ka codaynaysid;  
pollfinder.sos.state.mn.us.

Websitekayaga ayaad horay uga sii barankartaa sida loo codaynayo.

**Wixii Su'aalo ah?**

Email: [communications@hopkinsschool.org](mailto:communications@hopkinsschool.org)

Tel: 952-988-4099

Wixii faahfaahin dheeri ah waxaad ka heli kartaa websiteka:

[hopkinsschools.org/referendum](http://hopkinsschools.org/referendum).